



## **Golaha Waxbarashadu Waxay Ansixiyeen in Noofembar 12 Noqoto Maalinta Horumarinta Xirfadaha Macallimiinta**

Maalintii Jimcaha, Noofembar 12keeda, macallimiinta Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay heli doonaan maalin dheeraad ah sidii ay u kor ugu qaadi lahaayeen xirfadahooda iyo aqoontooda, iyo waliba inay ardaydu uga faa'iideystan afar maalmood oo fasax ah. Arrintani waxay timid markii Golaha Waxbarashadu kulankiisii maalintii Tallaadadda, ay u codeeyeen in bisha Noofembar 12keeda laga dhigo maalinta horumarinta xirfadaha macallimiinta,

Dugsiyada wadanka oo dhami waxay hore u qorsheeyeen in la xiro maalinta Khamiista, Noofembar 11keeda, si loo xuso Maalinta Sooyaalka Ciidamada, maalintaasi oo ah maalin fasax federaal ah. Sidoo kale marka la xiro dugsiga maalinta ku xigta, Dugsiyada Dadweynaha Portlanad ardaydoodu waxay heli doonaan afar maalmood oo isku xiga fasax ah.

Noofembar 12keedu waxay macallimiinta dib u siin doontaa maalin ay qaataan casharo ay ku horumarinaya xirfadahooda macalliminimo, ka dib markii in badan oo waqtigooda ka mid ahayd ay ku bixiyeen baahidii loo qabay in si nabadjelyo ah dib loogu furo dugsiyada intii lagu gudo jiray xanuunkani faafaya ee COVID-19.

"Marka aad eegto agabyo shaqaaluhu ay u baahan yihiin iyo waqtiga ay haystaan oo aad ugu yar shaqaalaha, caqabadaha na haystaa waxay tahay sidii aan u siin lahayn horumarinta xirfadaha macallimiintayadu si ay diirada u saaraan manhajkeena dhawaan la maalgaliyey kaasi oo la qabatimay diiradana saaraya qeybaha ugu muhiim casharada la dhigayo iyo dadaalada lagu talo jiro sidii loo soo yareynayo faraqa fursadaha ee u dhhexeeya ardayda," sidaasi waxaa yiri Dr. Shawn Bird, oo ah Ku-xigeenka Guddoomiyaha Waxbarashada, isaga oo ku qoray [warbixinta Golaha](#).

Xitaa iyada oo maalin waxbarasho meesha ka baxday, Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay ku socdaan jadwalka ardayda si ay fuliyaan [shuruudaha waqtiga waxbarashada](#) gobolka Oregon u dhigay dhammaan heerarkiisa kala duwan.

Dugsiyda degmadu sidoo kale waxay leeyihii dabacsanaan haddii ay lumaan dhowr maalmood oo waxbarasho marka ay cimiladu xumaato, Maalinta Madaxweynaha, ee bisha Febraayo 21keeda, ayaa loo isticmaali karaa maalmaha barafku dhaco si loogu soo gudo(taasi oo la wargalinayo 30 maalmood), iyo saddexda maalmood ee ugu dambeeyaa jadwalka taariikhda dugsiyada- Juun 13, 14, iyo 15- ayaa iyagana loo qoondeeyey in lagu soo gudo maalmaha barafku dhaco ee dugsiyada la xiro.